



Deeqda iyo amaahda waxbarashada ee la siiyo muwaadiniinta waddamada kale

Waxbarashada ayaa ah jidka loo maro suuqa shaqada ee Noorway

Qof kasta oo degan Noorway waa inuu awoodi karo inuu qaato waxbarasho. Waxbarashadu waxay muhiim u tahay in la helo shaqo. Taas darteed ayey dawladda Noorway u bixisaa deeqda iyo amaahda waxbarashada ee laga helo Sanduuqa Waxbarashada (Lånekassen). Deeqdu waa lacag lagu siinayo, amaahdu waa lacag la rabo inaad soo celiso. Shuruudaha amaahdu waa kuwo wanaagsan marka la barbardhigo amaahyada kale.

Waxaad heli kartaa deeq iyo amaah waxbarasho haddii aad Noorway ku haysatid sharci joogitaan oo rasmi ah, ama haddii joogitaankaagu ku salaysan yahay mid ka mid ah arrimahan:

- Magangelyo ama xaalad bani aadam oo weyn
- Midayn qoys
- Shaqaale Soonaha Dhaqaalaha Yurub ama xubnaha qoyska
- Guur/nolol wadaag aad kula jirto muwaadin Noorweyji ah
- Noorway u joogtid shaqo ama waxbarasho darteed

Waxbarashooyinka aad ku heli kartid deeq iyo amaah

- Dugsiga hose/dhexe ee dadka waaweyn
- Waxbarashada dugsiga sare
- Waxbarashada jaamacadaha
- Waxbarashooyinka kale (dugsi-xirfadeedyo, jaamacado dadweyne iwm)

Deeq iyo amaah nooc ee ah ayuu bixin karaa Sanduuqa Waxbarashadu?

Dhallinyaradu waxay waxbarashada dugsiga sare xaq u leeyihiin dhowr sanno (xaqa dhallinyarada). Intan ayey heli karaan:

- Ardayda oo dhan waxay heli karaan deeqda qalabka looga baahanyahay iskuulka.
- Ardayda aan ku noolayn guriga waalidka marka ay ku jiraan waxbarashada, waxa la siin karaa deeqda ardayda aan la noolayn waalidka (borteboerstipend).
- Ardayda ka tirsan qoysas dhaqaalahoodu liito, waxay heli karaan deeq ku xidhan dhaqaalaha soo gala, oo ah kabitaanka kharashka nolosha.

Dadka waaweyn som ee aan dhamayn dugsi hoose/dhexe ama dugsi sare, waxay heli karaan deeq iyo amaah loogu talagalay waxbarashadaas.

Haddii aad tahay qaxooti, oo lagu siiyey magangelyo, waxaad heli kartaa deeqda qaxootiga waxbarashada dugsiyada hoose/dhexe iyo sare.

Dhammaan ama inta badan lacagta lagu siiyo waxay noqonaysaa deeq lagu siiyey, oo ah lacag aad caadi ahaan soo celin doonin. Si aad deeqda qaxootiga u heshid saddex sanno, oo ah wakhtiga ugu badan ee aad heli kartid, waa inaad waxbarashada bilowdid saddex sanno gudahood kadib marka aad hesho magangelyo. Haddii aad xilli dambe bilowdid, waxa soo gaabanaya wakhtiga lagu siin karo deeqda qaxootiga, waa haddii aanad haysan carruur ama aanad marka hore qaadanayn waxbarashada dugsiga hoose/dhexe. Haddii aad heshid lacagta barmaamijka bilowga (introduksjonsstønad), isla mar ma heli kartid deeqda qaxootiga ee Sanduuqa Waxbarashada, laakiin waxaad heli kartaa amaah. Dadka codsi magangelyo u xaraysanyahay ma heli karaan deeq iyo amaah, laakiin mararka qaarkood ayey heli karaan deeqda qalabka.

Ardayda ku jirta waxbarasho sare ama waxbarasho kale waxay heli karaan amaahda kharashka nolosha iyo waxbarashada. Marka ay dhameeyaan waxbarashada ayaa qayb ka mid ah amaahda laga dhigayaa deeq. Kuwa masruufa carruur waxay xaq u yeelan karaan deeq iyo amaah dheeraad ah.

Lacagta aad ka helayso Sanduuqada Waxbarashadu waxa uu ku xidhanyahay da'da, xaaladda goyska iyo waxbarashada aad qaadatay.

Sanduuqa Waxbarashadu waxa uu deeqo gaar ah u sameeyey ardayda

- carruur u dhalato xilliga waxbarashada
- xanuunsada xilliga waxbarashada
- qaba laxaad ama awood yaraan

Bogga lanekassen.no ayaad ka haysaa macluumaad dheeraad ah. Iskuulkaaga ayaa isna ku siin kara macluumaad ku saabsan waxbarashada, deeqaha iyo amaahda.

Celinta amaahda

Amaahda waxaad u bixin doontaa bil bil kadib marka aad dhammayso waxbarashada. Waxa suurtagal ah in dib loo dhigo bixinta lacagta haddii aad bixin karin. Ma bixinaysid wax dulsaar ah marka aad ku jirto waxbarasho buuxda oo aad taageero ka heshid Sanduuqa Waxbarashada. Lacagta dulsarka ah waa la tirtiri karaa mararka ay jiraan xaalado gaar ah, tusaale ahaan haddii aad xanuunsatid ama aad noqoto shaqo la'aan oo isla markaana uu yaryahay dhaqaalaha ku soo galaa.

Macluumaadkan wuxuu ku saleysan yahay sharciyada sanad dugsiyeedka 2023–2024. Xeerarkan waxaa laga yaabaa in wax looga beddelo sannad dugsiyeedyada dambe.